
Macluumaadka Xeerka Isdhexgalka

Iyadoo la tixgalinaayo shaqsiyaadka loo ogolaaday mangalyo siin iyo ilaalin yar.

9 Juun 2017, qayb muhiim ah oo xeerka isdhexgalka ayaa la meel mariyay. Xeerka isdhexgalka waxay tahay ulajeedooyinkiisu in ay si dhaqsa ah is dhexgal u sameeyaan shaqsiyaadka loo ogolaaday magangalyada buuxda iyo tanku meel gaarka ah sidoo kale dadka iqaamada sharciga heesta ee wadan sedexaad kasoo jeeda. Nimaadkan wuxuu ku saleysan yahay wax is dhaafsi: Oo hal dhinac, doowladu waa in eey siisaa talaabooyin nimaadsan oo isdhexgal ah; iyadoo, dhinaca kalana, waajib ku tahay shaqsiyaadka ay qusayso in eey u fulinayaan si firfircoon kawada shaqaynta talaabooyinka la siiyay. Si loo hir geliyo mabda` taageerid iyo wax weeyndiinta.

Talaabooyinka isdhexgalka shaqsiyaadka loo ogolaaday magangalyada buuxda iyo tan ku meel gaarka ah.

Xeeraka is dhexgalka wuxuu tilmaamayaa talaabooyin is dhexgal ee qaybaha kor uqaadida luuqadda iyo wacyi gelin. Shaqsiyaadkaas loo ogolaaday magangalyada buuxda tan ku meel gaarka ah ee da`da 15 sano jir ama kawayn kuwaas oo la siiyay labadaas xaaladood midood (sharciga) kadib 31^{ka} Desember 2014 ayaa qayb ka ah bartilmaameedka kooxda xeerka.

Iyadoo loo fiirinaayo kan, waxaa qasab ah shaqsiyaadkaas la siiyay magangalyada buuxda iyo tan ku meel gaarka ah in ay fuliyaan talaabooyinkan soo socda:

1. Sixiixida Heshiiska isdhexgalka

Sixiixitaanka, shaqsiyaadkaas loo ogolaaday magangalyada buuxda iyo tan ku meel gaarka ah wexeey ogolaanayaan, kow, in ay ku dhaqmi doonaan dhaqamada aasaasiga ah ee sharciga iyo nidaamka bulsho, mida labaad in ay ku dhaqmi doonaan sharciga waajibka ah, ayna si buuxda ula shaqayn doonaan una dhamaynsan doonaan koorsada dhaqamada iyo Jarmalka ee la siiyay.

2. Ka qaybqaadasho buuxda, wadashaqayn firfircoon iyo dhamaystirka

→ Koorsada dhaqanka iyo hanuuninta

Iyadoo la eegayo talaabooyinka, ayaa la bari doonaa nidaamka dimuquraadiyada iyo mabaadi`da aasaasiga ah uu ku dhisanyahay iyo sharciyada nabad kuwada noolaanshaha. Ka qayb qaadashada koorsadan sideeda saac ah ee dhaqamada iyo hanuuninta ee hayada Integration ka waa waajib.

→ **Koorsada Jarmalka ee heerka A1**

Hayada isdhexgalka Austria ayaa bixineysa koorsooyinkan iyadoo la shaqaynaysa koorso bixiyaasha. Sida qayb ka ah koorsooyinkan, cilmi kusaabsan dhaqamada iyo hanuuninta ayaa si qoto dheer loo baran doonaa. Ka qayb galka koorsadaan luuqada waa waajib.

→ **Koorsada Jarmalka ee heerka A2**

Isla marka heerka A1 la gaaro, adeega shaqaalaysiinta dadwaynaha(AMS) waxay bixinaysaa koorsooyin heerka A2 ee kooxda bartilmaameedka ee loo ogolaaday magangalyada buuxda iyo ku meel gaarka, kuwaas oo awooda in ay shaqeeyaan, waxaa kaloo la siin doona aqoon luqadeed u gaara shaqada. Waxa kaloo koorsadan si qoto dheer lagu baran doona dhaqanka iyo hanuuninta. Ka qaybgalka koorsada luqada waa waajib.

Cunaqabateenada ka imaanaya fulin la'aanta talaabooyinka is dhexgalka
Haddii shaqsi heeysta megangalyo buuxda ama ku meel gaar uusan ka qayb qaadan, ama uusan si buuxda ula shaqayn ama uusan dhamaystiran mid kamid ah waxyaabooyinka kor lagu soo sheegay ee talaabooyinka isdhexgalka ee waajibka ah, xeerka is dhexgalka wuxuu siinayaa cunaqabteeno, qaas ahaan dhimida kaalmada bulsho(ceeyrta) fulinta ciqaabka waxaa u xil saaran xafiisyada ku shqada leh ee goboladda.

Nidaam is dhexgal oo mideeyan dadka loo heeysta qaxootino ama bini` aadanimo

Ka dib Isla markii la helo positif ama fiiso, shaqsiyaadka loo ogolaaday qaxootinimo ama bini` aadanimo waa in ay tagaan iyadoo la fiirinaayo xeerka megangalyo doonka ee §67 xarunta ÖIF ee qaabilsan. Waxaa la siin doonaa , balanta latalinta isdhexgalka waxana la saxiixi doonaa heshiiska isdhexgalka. Wada hadalka wacyi gelinta ayaa macluumaadka koorsada hanuuninta iyo A1 lagu siin doonaa . Sida ugu dhaqsaha badan ee luuqada heerka A1 loo gaaro,AMS ayaa sharciyan masuul ka ah sii wadida koorsada Jarmalka ee heerka A2.

Meelaha aad la xiriiri kartid

Waxaad ka heli kartaa warbixin dheeraad ah hayada isdhexgalka ee Austria:

www.integrationsfonds.at.

§67 lacag. 1 xeerka magangalyo siin: muwaadiniinta ajaaniibta ah kuwaas oo la siiyay darajada magangalyo siin ama ilaalinta yar waa in ay ka soo muuqdaan shaqsiyan xarunta isdhexgalka ee haayada isdhexgalka Austerian ayaa mas'uul ka ah joogtaynta gobalka dawlada dhexe isla markii kadib siinta darajada, darteed ujeedada kor u qaadida isdhexgalka. Muwaadinka ajnabiga ah waa in laga dhigaa mid ka warhaya waajibaadka isla marka la siinaayo darajada.